

Maajo 13, 2024

## **Dugsiga hoose Sagamore Hills wuxuu u Qaadaya Hal Tallaabo Weyn ee “Nooca Cagaaran’ Beerista Geedka Bisha**

*Kaliya waa Dugsiga Georgia ee Helayo Deeqaha Caalamka NASA*

Ma ahan maalin walba in qof uu beeri karo geed ku maqnaa bisha. Laakiin taasi waa waxa ay sameeyeen ardayda Dugsiga hoose Sagamore Hills, waxaa mahada leh hal macalin oo ka fikaray wax dhaafsan fasalka iyo booska, soohdinta ugu dambeysa.

Dugsiga hoose Sagamore Hills ayaa dhawaan laga gudoonsiiyay hadiyad gaar ah NASA - ee “geedka bisha.” Maajo 2, dugsiga wuxuu ku beeray dhirta a loblolly pine dhulalka kadib markuu macalinkooda STEM, Marwo Stephanie Spencer, ay ka codsatay Xafiiska NASA ee Ka qeybgelinta. Markii laga reebo boqolaal codsadayaasha, Sagamore Hills ayaa loo doortay mid ka mid ah qaatayaasha geedkaan gaarka ah oo waxaa helayo mid kaliya machadka waxbarashada ku yaal Georgia.

“Tan ayaa u ah waaya aragnimada waxbarashada fiican ardaydeena inagoo balaarineyno barnaamijkeena STEM,” Maamulaha Sagamore Hills Dhaqtar Karen Williams ayaa tiri.

Geedka Bisha Artemis I waxaa laga beeray miro ku wareegay bisha inta lagu jiray howgalka hawada laga soo bilaabo Nofeembar 16, 2022, illaa Diseembar 11, 2022. Sida waafaqsan NASA, miraha waxay ka safreenn 270,000 mayl dhulka ah iyagoo raacay dayax gacmeedka Orion. Noocyada kala duwan oo noocyada geedaha waxay ku dul duuleen oogada bisha. Qeybta ugu horeyso ee abuurista miraha waxaa la gaarsiiyay ku dhawaad 50 machadyo oo 48 gobol ah.

“Tan waxay ka qeybtahay ka qeybgelinta NASA STEM, iyo barnaamijkeena STEM wuxuu ku wareegayaan agagaarka howlaha oo ay carruurta ka qeybgeli karaan xalinta dhibaatada saxda ah,” Marwo Spencer ayaa tiri. “Carruurta waxay kormeerayaan geedka; waxay qiyaasayaan bil walba laga bilaabo sannadka xiggo, oo waxaan daryeelayaa xagaaga. Waxay la socon doonaan hormarka joornaaliistayaashooda bisha, oo waxay haynayaan joornaaladaas illaa ay ka dhameeyaan fasalka shannaad.”

Dhammaan heerarka fasalka ee dugsiga waxay leeyihiiin manhaj ku saabsan dhirta, iyo sidoo kale qaarkood waxay wax ka bartaan hawada. Mashruuca waa qaab isku dhaf ah, ma ahan kaliya barashada ku saleysan dhibaatada.

“Mashruucaan waxaa lagu isticmaali karaa dhinaca xisaabta lagu cabirayo geedka. Kan waa fadhi kale oo lagu kobciyo barnaamijkeena STEM,” Dhaqtar Williams ayaa yiri. “Waxaan qorsheynay inaan sii wadno mashruucaan oo aan daawano nidaamka kobaca geedka.”

NASA waxay bixineysaa xirmada casharka ka qeybgelinta STEM ee dugsiga marka lagu daro geedka bisha. NASA waxa ku casuumeycaa Sagamore Hills inay ka qeybqaataan shirarka onleenka laga bilaabo kuleelaha xagaaga 2024 si ay ula wadaagaan dadaaladooda looga qeybgelinayo ardayda K-12 iyo dadweynaha.

“Waxaan rajeynayaa, waaya aragnimadaan waxay u keeneysa xasuus iyo dano waaro oo dhaafsan maalintaan,” waxaa yiri Dhaqtar Williams.

XXX